# Waajibaadyada daryeelka waalidka iyo kuwa kale

**Waajibadyada  iyo kuw akale: waajibaadyada sharciga ah ee cusub**

Juune 2019, Dowladda Canada waxay samaysay isbeddelada *Xeerka Furiinka.* Qaar ka mid ah isbeddeladu waxay abuuraan waajibaadyo cusub waalidiinta iyo kuw akale ee haysta wakhtigada daryeelka waalidka ama masuuliyada go'aan gaadhida, ama qaybo ka ah arrinka maxkamadda si waafaqsan *Xeerka Furiinka.* Isbeddelan sidoo kale waxaa ku jira waajibaadyada cusub ee la taliyayaasha sharciga ah. Isbeddeladan waxaa lagu dabaqayaa Maarso 1, 2021.

Jilida danaha ugu wanaagsan ee ilmaha waa ahmiyada lambarka koowaad ee arrimaha sharciga qoyska ee ku lugt aleh carruurta.

*Xeerka Furiinka* ee cusub waxay dejiyeen waajibaadyada waalidka iyo kuwa kale inay caawiyaan xeerka danaha ugu fiican ee ilmaha, ay ku jiraan marka maxkamaddugu ay ku lug leeyihiin.

Isbeddelada *Xeerka Furiinka*  sidoo kale waxaa ku jira waajibaadyo cusub ee la taliyayaasha sharciga ah si loo caawiyo waalidka iyo kuwa kale ee buuxiya waajibadyadooda si waafaqsan Xeerka.

Dhokumentigan waxa
- waxa ay ku siiyaan macluumaadka waajib kasta, iyo
- waxay kaa caawisaa fahanka sida ugu wanaagsan ee loo buuxiyo waajibaadyadaada sharciga

## Boggana
- **Jilida danta ugu fiican ee ilmaha**
- **Ka ilaalinta carruurta khilaafka**
- **U isticmaalka khilaafka qoyska nidaamka xalka**
- **Bixin macluumaad dhammaystiran, sax ah oo cusub**
- **U hogaansanka kuwa kale**
- **Shahaadada:**
- **Waajibaadyada la taliyayayaasha sharciga ah**

- Haddii aad qabto amarka waafaqsan *Xeerka Furiinka,* waajibaadyadan sidoo kale adiga ayay kugu habboon yihiin.
- Haddii aanad lamaane ahayn laakiin aad taagan tahay meesha waalidka ama aad niyada ku hayso inaad istaagto

Waxaa jira shan waajib ee kooxaga oo waafaqsan *Xeerka Furiinka*

### 1) Jilida danta ugu fiican ee ilmaha

Gaadhida go'aamada danaha ugu fiican ilmahu waa muhiim. Danaha ugu wanaagsan ee ilmaha waa tijaabada maxkamaddu ay ku dabaqayso marka go'aan laga gaadhayo dacwadaha

ku lugt aleh carruurta, ioo hadda waa waajibka muhiimka ah ee waafaqsan *Xeerka Furiinka* cusub.

Si waafaqsan *Xeerka Furiinka* cusub, haddii aad hayso wakhti daryeelka waalidka ah, masuuliyadaha go'aan gaadhida ama xidhiidhka lala leeyahay ilmaha, waa inaad ku dhaqantaa danaha ugu fiican ee ilmahaas marka lagu dhaqmamayo masuuliyada loo qaaday iyaha.

*Xeerka Furiinka* cusub waxa ka mid ah tirada asbaababaha gaarka ah ee lagugu caawiyo adiga oo maxkamaddu waxay go'aan ka gaadhaa waxa u wanaagsan ilmahaaga xaaladaada gaarka ah. Asbaabahan, sida ilmaha

- baahiyahiisa, ku cad da'dooda iyo marxalada koriinka, sida baahidooda degenaanshaha
- xidhiidhka ay la leeyihiin waalid kasta
- xidhiidhka ay la leeyihiin walaalaha, ayayda ama awowga iyo dadka kale ee muhiimka u aha noloshooda
- maaraynta daryeelka ka hor kala maqnaanshaha iyo qorshayaasha mustaqbalka ee daryeelka ilmaha
- aragtiyaha iyo dookhyada
- dhaqanka, luqadeed, diimeed iyo koriinka ruuxiyeed iyo dhaxaleed, ay ku jiraan soo korinta sida dadka asal ahaan loogu yimid iyo dhaxalka.

Asbaabaha kale waxaa ka mid ah kartida waalid kasta iyo u diyaar ahaansshaha

- in la daryeelo ilmaha.
- taageer xidhiidhka ilmaha ee waalidka kale
- la shaqee oo kala xidhiidha waxa ku saabsan arrimaha daryeelka waalidka

Waxaa sidoo kale jira asbaabo kale oo saamayn kara badbaadada ilmaha sida

- rabshad kasta oo qoyska ah iyo saamaynta ay ku leedahay
  - kartida u diyaar ahaanshaha qof kasta oo qayb ka ain dhaqanka rabshada si loo daryeelka oo loo buuxiyo baahiyaha ilmaha, iyo
  - habboonaanta samaynta amarka u baahanaha in la iska kaashad arrimaha saamaynaya ilmahaaga
- dacwada jirta ee madaniga ah ama falka dembiga, amarka, xaalada, ama tallaabada la xidhiidha badbaadada, amniga iyo fayo qabka ilmaha

Ka feker asbaabhan marka aad gaadhayso go'aan ku saabsan ilmahaaga. Tusaale ahaan, haddii aad doorato dugsi cusub, adiga iyo waalidkaagu waa inaad go'aan gaadhaan ku salaysan midka ugu wanaagsaan doona ilmahaaga. Haddii adiga iyo waalidka kale aydaan ku heshiin, garsoore waxa uu eegayaa asbaabaha la midka ah ee sare si uu go'aan u gaadho.

| Macluumaadka badan ee asbaabaha danaha ugu fiican waxaa laga heli karaa halkan. |
|---|

## 2) Ka ilaalinta carruurta khilaafka

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad u samayn karto carururtaadu waa inaad iyaga ka ilaaliso inay mamqlaan khilaafka u dhexeeya adiga iyo waalidka kale.

*Xeerka Furiinka* ee cusub waxa uu dhigaa waajib gaar kugu ah adiga si aad sida ugu wanaagsan uga ilaaliso carruurtaada khilaafka dhici kara sidii natiijadada kala maqnaanshahaag ama furiinta.

Si lagaaga caawiyo buuxinta waajibkan, halkan waxaa ah dhowr shay oo niyada lagu haynayo:

- isku day inaad ka ilaaliso la muranka ama kala hadalka faahfaahinta arrinkaaga maxkamadda marka carruurtu ay maqli karaan – miduun sug ilaa aanay guriga iman ama isku day inaad tagto meel kale oo aanay adiga kaa maqli karin adiga
- iska ilaali dheleecaynta ama cabashada ku saabsan waalidka kale carruurta horteeda
- iska ilaali carruurta inaad dareensiiso inay "dhinacyada kala raacaan" oo ku lid ah waalidka kale

Qareen, dhexdhexaadiye ama xirfad yaqaanka sharciga qoyska ee kale waxay caawin karaan inay la yimaadaan farsamooyinka lagu caawinayo si looga ilaaliyo carruurtaada khilaafka.

### 3) Isticmaalka nidaamka khilaafka xalka qoyska

'Nidaamka xalka khilaafka qoyska' waa eray bixinta cusub ee *Xeerka Furitaanka.* Waa nidaamka ka baxsan maxkamadda in qoysaska ay isticmaali karaan arrimaha la xidhiidha daryeelka waalidka, taageerada qoyska, iyo qaybo waalidka ah, hantida. Tusaalooyinka nidaamyada xalka khilaafka qoyska waxaa ka mid ah wada hadalka, sharciga wada shaynta leh, dhexdhexaadinta iyo dhexdhexaadiska.

Si waafaqsan *Xeerka Furiinka* ee cusub, waxaad u baahan yahay inaa disku daydo inaad xaliso arrimaha sharciga qoyskaaga addoo isticmaalaya nidaamka xalihta khilaafka qoyska, laakiin keliya way haboon tahay. Tusaale ahaan, nidaamayada xalka khilaafka qoyska kuma habboonaan karaan haddii aad la kullanto rabsahda qoyska oo ay jiraan arrimaha badbaadada ee joogtada ah, ama ay jiraan awooda aan isku dheeli tirnayn ee adiga iyo qofka kale.

Waxaa jira faa'iidooyin badan oo ah isticmaalka nidaamyada xalka khilaafka qoyska beddelka halkii garsoore uu go;aan kuugu gaadhi lahaa adiga:

- waad og tahay waxa carruurtu u baahan yihiin. Tani way adkaan kartaa in la sharaxo garsooraha keliya arka sawirka qoyskaaga muddada nidaamka maxkamadda
- xalinta khilaafka qoyska wuu ka qiima jabnaan karaa oo ka degdeg bataan in maxkamadda la tago
- way kuu wanaagsanaan kartaa adiga si loo arko waalidka oo ka wada shaqaynaya
- qayb nidaamyada xalinta khilaafka qoyska waxay caawin kartaa horumarinta kartida si loo wada xidhiidho

Qareen, dhexdhexaadiga iyo xirfad yqanaanka kale ee qoyska waxa uu kaa caawin karaa inaad go'aan ka gaadho nidaamyada ay yihiin xalka khilaafka qoyska ee adiga aadka kuugu fiican.

Waxaad ka raadin kartaa websaudka Waaxda Cadaalada Canada halkan si aad u aragto haddii ay jiraan nidaamyada dowladda qoyska ku salaysan ee xalka khilaafka qoyska aagaaga.

| |
|---|
| Waxaa jira qaabab badan oo dadku ay ku gaadhaan go'aanada ee ku saabsan arrimaha la xidhiidha kala maqnaanshaha ama furitaanka. Waxaad go'aan ka gaadhi kartaa habka aadka kuugu habboon adiga iyo qoyskaaga. Dhib ma leh waxa uu yahay nidaamka aad |

isticmaasho, waa muhiim in xooga la saaro ee danta ugu fiican carruurtaada. La tasho Xaashida Xaqiiqda - Xalka khilaafka qoyska: xalinta arrimaha sharciga qoyska ee ka baxsan maxkamadda.

## 4) Bixin macluumaad dhammaystiran, sax ah oo cusub

*Xeerka Furiinka* cusub waxa uu sheegayaa in kooxahu ay leeyihiin waajibka lagu bixiyo dhmmaan macluumaadka loogu baahan yahay si waafaqsan *Xeerka Furiinka* iyo sharciyadeeda. Tani waa sidaas waalidku way ka heshiin karaan oo maxkamaddu waxay samayn kartaa amamro ku salasayn macluumaadka saxda ah.

Tusaale ahaan, si loo caawiyo maxkamaddu inay go'aan ka gaadho qadarka saxda ah ee xaqada ah ee masruufka ilmaha ee waafaqsan Tilmaamaha Masruufka Ilmaha Federaaliga (sharciyada waafaqsan *Xeerka Furiinka*), waxaad u baahan tyahay inaad bixiso macluumadka dhammayska tiran, saxda ah ee u dambeeyay ee dakhliga. Tan macneheedu waxa weeyie in la bixiyo

- canshuur celin dakhligaaga ee mid walba oo ka mid saddexdii sanno ee ugu dambeysay
- foomamka ogeysiisyada qiimeynta iyo dib-u-qiimeynta ee ka yimi Wakaaladda Dakhliga Kanada (Canada Revenue Agency) ee mid walba oo ka mid ah saddexdii sannad canshuureed ee ugu dambeeyey

Iyaddoo ku xidhan xaaladaada, sidoo kale waxaad u baahan kartaa macluumaad kale, sida

- warbixintaadii ama warqadda mushaharka ee ugu dambeysay, ama warqad ka timid loo shaqeeyahaaga oo sheegeysa mushaarkaaga ama mushaharka todobaadkii
- warbixinahaga  wada shaqaynta dahqaale, haddii aad iskaas u shaqaysato, ama haddii aad maamusho shirkad
- macluumaadka ku saabsan dakhliga aad ka hesho caymiska sahqada

Macluumaad badan oo ku saabsan sid aloo bixiyo macluumaadka buuxa, saxda ah ee cusub ee dakhliga wixii ah ujeedooyinka masruufa ilmaha waxaa laga heli karaa halkan.

Qoyskaska ku lugu lahaanshahooda maxkamaddo badan

Qoysaska wakhtiyada qaarkood waxay ku lug lahaadaan maxkamadda isku wakhti. Tani inta badan waa run xaaladaha rabshada qoyska, marka nidaamka cadaalada falka dembiyeed, nidaamka ilaalinta ilmaha, iyo nidaamka cadaalada qoysku ay dhammaan ku lug lahaan karaan.

Xaaladahan waxay noqon karaan kuwa dhib badan. Tusaale ahaan, haddii maxkamadda qoysku aanay garanayn wax ku saabsan amarka falka dembiyeed ee sheegaya inaanay jiri karin wax xidhiidh ah oo u dhexeeya waalidka, garsooraha waxa uu samayn karaa amarka daryeelka waalidka is khilaafsan. Tani waxay adkayn kartaa ama ka dhigtaa mid aan suuragal ahayn in la raaco labbada amar oo waxay abuuri kartaa khataraha badbaadada.

Si tan wax looga qabto, *Xeerka Furiinka* cusub waa uu sheegaa in garsoorahu uu ku xisaabtamo haddii ay jiraan wax kuwa hadda ah ama ilaalinta madaniga ah ee aan weli la oggolaan, ilaalinta ilmaha, ama dacwada falka demiyeed ama amarada kale ee la xidhiidha furitaanka lamaanaha.

Haddii lagu furay ama lagu furayo oo aad dalbanayso amarka maxkamdda daryeelka walid, masruufka carruurta ama taageerada kafiilka, waxaad u baahan doontaa inaad maxkamadda u sheegto wax ku saabsan dawacdo kasto oo falka dembi ama ilaalinta carruurta ama amarada kugu lug yeelaysiiya adiga ama xaaskaagii hore, ama wax ku saabsan xayiraada ama amarada ilaalinta ah ee ku lid ah mid idinka mid ah.

Macluumaadka dheeraadka ah ee qoysaska ku lugta leh qaybaha kala duwan ee nidaamka cadaalada waxaa laga heli karaa halkan.

Waxaad leedahay waajibaadka sharciga ah ee lagu bixinayo dhammaan macluumaadka muhiimka ah maxkamadda marka lagu waydiisto. Maxkamaddaha waxay leeyihiin qaabab ay ugu khasbaan shakhsiyaadku inay ku bixiyaan macluumaadka loogu baahan yahay si waafaqsan *Xeerka Furiinka* iyo sharciyadiisa, sida samaynta amarada shaacinta, laakiin tani waxay keentaa daahitaanada aan ahayn dankta ugu fiican ee ilmahaaga.

### 5) U hogaansanka amarada

*Xeerka Furiinka* cusub waxa uu xusuusinayaa kooxaha hal mar maxkamaddu u soo saartay marka, waa inaad raacdaa amarkan.

Tani maaha waajib cusub, laakiin waalidku wakhtiyada qaarkooda si khalad ah waxay u rumaysan yihiin in aanay raacin amarada sharciga qoyskooda.

Tusaale ahaan, waa inaad bixisaa masruufka ilmaha ilaa amarka aanu in dheeraad ah dhaqan gal ahayn. Tan macnaheedu waxa weeye haddii amarka aanu sheegin marka aad joojin karto bixinta masruufka ilmaha, waa inaad bixisaa masruufka ilmaha ilaa mamxkamamddu ay beddesho amarka.

Si la mid ah, haddii amarada maxkamadda jadwalka daryeelka walaid ee gaarka ah, si keligaa ah ugama mamnuuci kartid waalidka kale inuu ku dhaqmo wakhtiga daryeelka waalidka sabab la'aan.

Haddii aad raaci waydo amarka, waxaa jiri kara cawaaqibka sharciga khatarta ah. Tusaale ahaan, maxkamadda waxay soo saari kartaa amarka xaqiraada adiga kugu lidka ah. Maxkamaddu markaa waxay ku soo rogaysaa ciqaabaha, ay ku jiraan

- ganaaxa lagu bixiyo maxkamadda
- lacagta la siiyo kooxda kale wixii ah kharashyada maxckamadda (ee tusaale ahaan, kharashayada qareenka)
- wakhti xabis, xaaladadaha aadka ah

Wakhtiyada qaarkood waxaad dooni kartaa inaad raaco amarka maxkamadda sababtoo ah waxaa jiray isbeddelka noloshaada ama nolosha ilmahaaga ee amarka maxkamaddu aanu daboolin. Waxaad rumaysan kartaa in amarka maxkamadda aanay in dheeraad ah ahayn danaha ugu fiican ee ilmahaaga.

Xsaaladan, waa inaad idb ugu noqotaa maxkamadda si aad u waydiisato amarka in la beddelo si ay u muujiyaan xaalad cusub. Ilaa amamrka la beddeli mooyaane, waa inaad raacdo amarka asalka ah.

**Shahaadada:**

Waa muhiim in dib loo eego waajibaadyadaada oo aad raaxo ka dareento inaad tidhaahdo inaad fahantay iyaga.

Si waafaqsan *Xeerka Furiinka* cusub, wakhti kasta oo aad ku soo xarayso dhokumenti maxkamadda -- haddii ay bilaabanto arrinta maxkamadda ama aa dka jawaabto hal - waxaad xaqiijin doontaa inaad fahanto mid kasta oo shantaada waajibaad ah si waafaqsan *Xeerka Furiinka.*

Tani waxay ku habboon tahay qof kasta oo ah kooxda arrinka maxkamadda. Waxaad u baahan doontaa inaad xaqiijiso haddii aad leedahay qareen ama aad metelayso naftaada.

**Xusuuso – waajibaadkaagu inay yihiin**

1) **Inaad ku tallaabsato danaha ugu fiican ee carrruurtaada**
2) **Inaad carruurtaad aka ilaaliso khilaafka**
3) **Isku daydo xalka khilaafka, iyaddoo aanay habboonayn mooyaane**
4) **Aad bixiso dhammaan macluumaadka dacwadaada maxkamadda**
5) **Aad raacdo amarka maxkamadda**

## Waajibaadyada la taliyayayaasha sharciga ah

Sida waafaqsan *Xeerka Furiinka,* la taliyaha sahrciga waa xirfad yaqaan ku takhasusay inuu ku siiyo talo sharci ama ku metelo adiga si waafaqsan Xeerka. Gobolada qaarkood, waxaa ka mid ahaan karaa nootaayo ama xirfad yaqan sharci.

Isbeddelada *Xeerka Furiinka* sidoo kale lagu dhigay waajibaadyo cusub ee la taliyayaasha sharciga ah si lagaaga caawiyo waajibadyadaada si waafaqsan Xeerka. Tusaale ahaan, la taliyayaasha u baana inay

- dhiirigeliyaan macaamiishooda si ay isugu dyaan isticmaalka nidaamka xalka khilaadka qoyska si loo xaliyo arrinka qoyskooda, iyaddoo si cad aanay u habboonayn mooyaane
- u sheeg macaamiishooda wax ku saabsan adeegyada calaadada qoyska ee caawin karta inay xaliyaan arrimaha qoyska ama buuxiyaan waajibaadyada waafaqsan *Xeerka Furiinka*

La taliyayaasha sharcigu sidoo kale waxay leeyihiin waajibka ay kuugu sharaxaan waajibaadyadaada adiga.

| |
|---|
| Macluumaadka badan ee ku saabsan adeegyada cadaalada ee qoyska waxaa laga heli karaa halkan. |

La taliyayaasha sharciga sidoo kale waxay leeyihiin waajibka ay ku caddeeyaan inay u hogaansameen waajibaadyadooda si waafaqsan *Xeerka furiinka.*

### Linkiyad ala xidhiidha

- Samaynta Qorshayaasha hagitaanka qaban qaabda daryeelka waalidka ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka
- Liiska magacyada Qorshaha Daryeelka waalidka
- Agabka  qorshaha daryeelka waalidka
- Xaashida xaqiiqda daryeelka waalidka
- Xaashida xaqiiqda xalinta khilaafka Qoyska
- Xaashida xaqiida furitaanka iyo rabshadda qoyska